

TILMAAN-BIXINTA DHMAYSTIRKA CODSIGA BARNAAMIJYADA TAMARTA MINNESOTA 2005-2006

Kani waxa weye codsiga Barnaamijyada Tamarta Minnesota ee 2005-2006. Gobolka Minnesota wuxuu ugu deeqaya qoysaska degan Minnesota barnaamijyo kala duwan oo kaalmo ah si ay guryahooda ugu helaan tamarta ay u baahan yihiin iyo horumarinta wax-qabadka fiican ee tamarta ee guryahooda. Foomka ku lifaaqan waxaad ugu adeeganaysaa sida codsiga Barnaamijka Kaalmada Tamarta, Barnaamijka Kaalmada ee Cimilada, Sharciga badbaadinta Cimilada Qabowga ah.

Warqadda Codsiga Barnaamijyada Tamarta Minnesota waxaa la helaya marka la codsado ayada oo noocya kale ah, iyo luqado kale ku qoran yihiin, oo ay ku jiraan farta dhigmada waa-weyn ee loogu talagalay dadka indhaha la'.

Fadlan akhri arjiga kana jawaab su'aalaha **oo dhan**. Waa in aan helnaa dhowr waxyaabood si aan kuugu xareyno arjigaaga. Haddii aad doonaysid in kaalmo aad weydiisato **waa in aad noo soo dirtaa**:

- θ **Arjigaan** oo si dhameystiran loo buuxiyay lana soo saxiixay.
- θ Nuqullada ama koobiyada **caddeynaya dakhliga (proof of income)** ee qof kasta ee ka tirsan qoyska ee saddexdii bilood ee la soo dhaafay.
- θ Nuqullada **biilkii kululaynta (heating)** iyo **biilkii korontada** ee u dambeeyey.

QEYBTA 1 waxaa lagu weydiinaya macluumaadka shakhsi ahaaneed. Fadlan buuxi qeybtan haddii Lambarkaaga Badbaadada Bulshada (Social security), magacaaga, cinwaankaaga, lambarka taleefoonkaaga, ama meesha lagaala xiriirayo aan la arkin ama haddii macluumaadka larkay aan sax ahayn.

Waa in aad keentaa Lamarkaaga Badbaadada Bulshada (Social Security) si ay faa'iidooyinka aad u heshid. Kani waa loo baahan yahay!

QEYBTA 2 waxaa lagu weydiinaya in aad liiska ku qortid magaca, Lambarka Badbaadada Bulshada (Social Security), taariikhda dhalashada, qolada, jinsiga (lab ama dheddig), darajada ugu sareyso ee dugsiga uu dhameeyey, haddii qofka uu hore u lahaa dakhli kasta oo la soo sheegay (Haa ama Maya), dhamaan dadka qoyska ka tirsan, oo ay ku jiraan adiga nafsadaada.

Waxaa kale oo lagu weydiinaya in aad soo wargelisid dakhliga xubin kasta oo ka tirsan qoyska. Waa in aad ku soo lifaaqdaa caddeynta dakhliga dhamaan qoyska 3 bilood ka hor inta aadan codsanin barnaamijka, laakiin kuma jiro bisha aad barnaamijka codsanaysid.

Local
Logo

MINNESOTA ENERGY PROGRAMS APPLICATION

Agency Name
Agency Address
City, State, Zip
Phone: (xxx) xxx-xxxx Fax: (xxx) xxx-xxxx

Xafiiska kaliya u gaar tahay halkaan

HH#: _____
Rep # _____
Grant amount _____



Warqaddani waxaa la helaya ayada oo noocya kale ah iyo luqado kale ku qoran yihiin markii la codsado

• Qeybta 1. MACLUUMAAD SHAKHSI AHAANEED

Lambarkaaga Badbaadada Bulshada (Social Security):		<input type="text"/>	
Magacaaga:			

Magaca Hore	Bilowga magaca dhexe.	Magaca Dambe	
Cinwaanka Guriga:			
_____	_____	MN	_____ - _____
Wado	Lambarka Guriga #	Magaalada	Gobolka Tirada koodka (zip code)
Qofka kugu dhow eel ala xiriirayo (haddii ay ku khuseyn)			
Magaca Hore _____ Magaca Dambe _____ Lambarka Taleefoonka (____) _____			
Cinwaankaaga Boostada (haddii uu ka duwan yahay kan Guriga)			
_____	_____	MN	_____ - _____
Wado	Lambarka Guriga #/PO Box	Magaalada	Gobolka Tirada koodka (zip code)
Degmada:		Xaafadda:	
_____		_____	
Telefoonka Guriga:		Telefoonka Deg-dega ah:	
(____) _____		(____) _____	
Luqada kowaad ee guriga looga hadlo:		<input type="text"/>	

Cod-bixinta ma isu-diiwaangelisay? Haa Maya

Haddii aad cod-bixinta isu-diiwaangelinin, ma doonaysaa in aad sameysid? Haa Maya

• **Qeynta 2. Macluumaadka Qoyska**

Miyaad ka mid tahay shaqaalaha ama Guddiga Sare (Board) ee haya' ddaan? Haa Maya
Immisa qof ee qoyska ka mid ah ayaa dakhli soo galay 3dii bilood ee tagtay? _____

QOR DADKA KA TIRSAN QOYSKA OO DHAN OO AAD KU JIRTID: Waraaq dheeri ah ku sso xir haddii aad u baahato.

Magacda dadka ka tirsan qoyska Magaca Hore, Bilowga Magaca dhexe, iyo Kan Dambe	Lambarka Caymiska Dadwenaha (Social Security) (waxaa looga baahanyahay xubin kasta oo qoyska katirsan oo dakhli leh)	Taariikhda Dhalashada Bisha Maalin Sannad BB / MM / YYYY	Jinsiyadda Jinsi	Naafo: Haa / Maya	Inta Sanno ee Dugsi aad dhigatay	Ma leedahay Dakhli Haa/M aya
1.		/ /				
2.		/ /				
3.		/ /				
4.		/ /				
5.		/ /				
6.		/ /				
7.		/ /				
8.		/ /				

Jinsiyadda: A=Asian ama Pacific Islander; B=Black ama African American, aan ahayn Hispanic; H=Hispanic; I=American Indian ama Native Alaaskan; W=White, aan ahayn Hispanic; M= Multicultural; **Jinsi:** F=Haween; M= Rag
Naafo: Waa qof naafo ka ah xagga jirka ama maskaxda ee in badan hoos u dhacday in uu qabsado mid ama ka badan ka mid ah howlaha ugu waawayn ee nolosha.

MEELAHA DAKHLIGA IYO KAALAMADA KAA SOO GALAAN

(Calaamadee dhamaan kuwa khuseeya qoyskaaga)

- | | | |
|--|--|--|
| <input type="checkbox"/> Khidmo | <input type="checkbox"/> Caymiska Dadweynaha | <input type="checkbox"/> Hawl Wareejin (DWP) |
| <input type="checkbox"/> Iskii U Shaqeyste / Dahkliga Beerta | <input type="checkbox"/> Naafonimada Badbaada Bulshada (Social Security) | <input type="checkbox"/> MFIP/TANF |
| <input type="checkbox"/> Dahkliga Ijaaaarka | <input type="checkbox"/> Naafonimo muddo dheer/gaaban | <input type="checkbox"/> Macaawinada Guud (GA) |
| <input type="checkbox"/> Caymiska Shaqo Beelka (Unemployment Comp) | <input type="checkbox"/> SSI | <input type="checkbox"/> Kaalmada Raashinka |
| <input type="checkbox"/> Caymiska Dhaawaca Shaqo | <input type="checkbox"/> MSA | <input type="checkbox"/> Taageeridda Caruurta |
| <input type="checkbox"/> Dahkliga Dulsaarka | <input type="checkbox"/> Hawl-gab/Gunnada macaash-macaashka | <input type="checkbox"/> Taageeridda Xaaska |
| <input type="checkbox"/> Dulsaar ka yimid Dhaxal | <input type="checkbox"/> Howl Gabka Ciidanka | <input type="checkbox"/> Dahkhiyada Kale |

Xusuuso in aad ku darded caddeynta dakhliga dhamaan xubnaha qoyskaaga ka tirsan. Codsigaaga wuu daahi doona haddii aadan sameynin arrintaasi

<p align="center">Soo dir Caddeynta Dakhliga Guud ee 3dii Bilood ee la soo Dhaafay oo Idil ee qoyska oo dhan marka laga reebo mushaarka carruurta dhigata fasallada Xanaanada (K) ilaa fasalka 12</p> <p align="center">(Fiiri tussaleyaasha hoos ku qoran)</p> <p align="center">Saxiix kadibna soo dir kuna soo hagaaji cinwaanka ku qoran arjiga</p>				<p align="center">Ma aha in aad kor ugu dhaaftid heerka u degsan dakhligan ee 3 bilood:</p>	
Haddii aad saxiixdid arjigan (bisha)	Soo dir Caddeynta Dakhliga ee bilaha:	Haddii aad saxiixdid arjigan (bisha)	Soo dir Caddeynta Dakhliga ee bilaha:	Tirada Qoyska (TQ)	Dhakhliga
Sebteembar 2005	Juunyo, Luuliyo, Agoosto, 2005	Febraayo 2006	Nofe., Dis., 2005, Jan., 2006	1	\$4,987
Oktoobar 2005	Luuliyo, Agoosto, Seb., 2005	Maarso 2006	Dis., 2005, Jan., Feb, 2006	2	\$6,522
Nofeembar 2005	Agoos., Seb., Okt., 2005	Abriil 2006	Jan., Feb., Maarso, 2006	3	\$8,056
Diseembar 2005	Seb., Okt., Nofe., 2005	Maajo 2006	Feb., Maarso, Abriil, 2006	4	\$9,591
Janaayo 2005	Okt., Nofe., Dis., 2005	Xillaga arjigu waxa uu ku egyahay Maajo 31, 2006		5	\$11,126
				6	\$12,660

• Qeybta 3. Macluumaadka Guriga

Nooca Guriga:

- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Guri (House) | <input type="checkbox"/> Abaartameento/ Sakad (Apartment/ Condo) |
| <input type="checkbox"/> Guri la wadaago (Townhouse) | <input type="checkbox"/> Guri la raran karo (Mobile Home) |
| <input type="checkbox"/> Guri Cass ama labo qeyb ah (Duplex) | <input type="checkbox"/> Guri Saddex qeybood ah |
| <input type="checkbox"/> Guri Afar qeybood ah | <input type="checkbox"/> Guryo Noocyo Kale ah |

Wakhti intee le'eg ayaad ku noolayd gurigaan? _____

Ma adigaa leh gurigaaga? Haa Maya

Bil kasta immisa ayaad ijaar ama hakbad (mortgage) u **bixisaa**? \$ _____

Ka jawaab saddexda su'aalood ee soo socota oo keliya haddii aad kiraysatay guriga:

Ijaarka dawladdu ma kaa caawisaa ama ma ku nooshahay guryaha ijaarkooda la kabo (subsidized)? Haa Maya

Kharashka kululayntu ma ku jiraa ijaarka? Haa Maya Korontadu ma ku jirtaa ijaarka? Haa Maya

Milkalaha magaciisa _____ Milkilaha teleefoonkiisa _____

Qeybta 4. Sharciga Badbaadinta Cimilada Qabow

Buuxi saddexda su'aalood ee soo socda oo *keliya haddii* aad gurigaaga ku kululaysato gaaska dabiiciga ah ama koronto. Haddii lagu ogolyahaya in laga kaalmeeyo tamarta, waxaad ayadana kuu bannaan in aad hesho kaalmada ka hortagga xilliga qaboobaha ee ka bilowda Oktoobar 15keeda kuna dhammaada Abriil 15keeda. Jawaabaha su'aalaha soo socda saamayn kuma yeelan doonaan ogolaashaha in aad kaalmo ka heshid Baarnaamijyada Kaalmada Tamarta (BKT) ama inta ay kaalmadu inta ay noqonayso midna.

Kani waxa weye caddeynteysa in aan awoodin in aan iska bixiyo kharshkayga tamarta xilliga bilaha cimilada qabowga. Waxa aan fahamsanahay in aan ku khasbanahay in aan la xiriirto shirkadaha tamarta (ee gurigayga) si aan u la samaysto qorshe lacag bixineed. _____ (Haddii aad caddayntan waafaqsantahay Xarafka magacaaga ka bilowda halkan ku qor)

Ma kula noolyahay qof xanuunsan ee xaalad caafimaad darteed aanan ka maarmin koronta ama kulayl kale in gurigu si joogta ah u yeesho? Haa Maya

Haddii aad ku jawaabtay Haa, waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo in aad keentid caddeyn.

Haddii aad dooneysid caawinaad la xiriira codsiga barnaamijka Badbaadinta Sharciga Cimilada Qabow, waxaad diyaarsan kartaa qof kale oo kuu soo hela nuqulka ogeysiis kasta oo ku saabsan jarida tamarta, iyo macluumaad kale oo muhiim ah, isla markiina waad helaya. Qofka kuu soo helayo ogeysiiska qeybta-saddexaad mas'uul kama aha bixinta kharashkaaga. Qofkan wuxuu keliya uu oglayahay in uu kaacaawiyo ogeysiiska la xiriira barnaamijkaaga waxtarka (korontada, kulaylka, biyaha, tamarta, iwm). Adiga iyo qofka aad adigu doonaysid in uu ku ogeysiyo barnaamijka waa in aad buuxisaan foomka, saxiixdaan, iyo boostada ugu dirtaan shirkada waxtarka (korontada, biyaha, kulaylka, tamarta iwm). Ma doonaysaa in shirkadaada tamarta ay u soo dirto foomka ogeysiinta qofka-saddexaad? Haa Maya

Haddii aadan iska bixin biilasha tamarta kululaynta xilliga qaboobaha (jiilaalka), shirkadaada korontadu way kaa goosanaysaa tamarta kulaylka ama korontada. Haddii aad dib uga dhacdid bixita biilasha oo lagu soo diro ogeysiin joojin tamareed, isla markiiba wac shirkadaada tamarta lana samayso qorshe biil bixin ah si uu kuugu socodo kulaylku.

• Qeybta 5. Macluumaadka Tamarta Qoyska iyo Meelaha ay ka helaan Kulaylka

Ku qor "1" nooca tamarta kululaynta ee ugu isticmaalka badan yahay. Sidoo kale ku hor qor "2" nooc kasta oo kale ee ay isticmaalaan qoyskaaga.

Saliid (Oil)	Brobayn (Propane/LP)	Qoryo	Uumi (Muni. Steam)
Gaaska _____	Koronto _____	Dhuxul (coal) _____	Kululaynta Degmada St. Paul _____
Dabiiciga _____	_____	_____	Noocyo kale _____

Haddii aad xaabo ku kulaysanysid, ka jawaab saddexdaan (3) su'aalood:

Waa immisa qol gurigaagu? _____

Qoryaha aad shidato ma adiga ayaa soo gurta? Haa Maya

Boqolkiiba intee aad xaabo ayaad isticmaashaa? (fadlan goobo gali boqolayda habboon)

10%	20%	30%	40%	50%	60%	70%	80%	90%	100%
In yar (oo qoryo ah) haddii aad isticmaasho			Haddii kulaylku guriga barkiis ka yimid qoryo aad shidatay				Hadii aad qoryo kaliya isticmaasho		

SHIRKADAHEE ISKA LEH SHIDAALKA IYO KORONTADA GURIGAAGA?

Magaca shirkada leh shidaalka:		Magaca shirkadda leh korontada:	
Magaca Qofka ku qoran biilka:		Magaca Qofka ku qoran biilka:	
Lambarka koontada:		Lambarka koontada:	

Soo dir nuqulka kharashkaaga korontada iyo kharashkaaga kulaynta ama risiidka shidaalka soona raaci codsiga.n

Ma rabtaa in 30% biilkaaga korontada toos loogu diro shirkadda korontada? Haa Maya

Dadka leh guryahooda: Wax dhib ah ma kaaga yimaadaa kululeeyaha guriga (furnace)? Haa Maya

(Haddii ay jawaabtu tahay maya teleefonkayaga ku dhagso kululeeyaha (furnace) korkiisa. Haddii aad ku aragto dhibaato annaga na soo wac MARKA HORE.)

• Qeybta 6. Macluumaadka Xaafadda

Barnaamijka sanadka, wuxuu bilaabanaya 1da bisha Oktoobar, 2005 wuxuuna dhamaanaya 30ka bisha seteembar, 2006:

Waxaan ogolaanshahayga siinaya shirkadayda kulaylka iyo korontada si ay u siiso barnaamijyada kaalmada tamarta iyo cimilada faa-faahin ku saabsan xisaabtayda iyo isticmaalka tamarta. Waxaan kale oo aan fahamsanahay macluumaadka aan ku bixiyey codsigan in ay isticmaali karaan Waaxaha Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada iyo Tamarta ee Maraykanka, iyo qandaraaslayaashooda, Waaxda Ganacsiga Minnesota, iyo qandaraaslayaasheeda, una isticmaalayaan ujeeddo baaris macluumaad iyo qiimeynta barnaamijka.

Waxaa kale oo aan ogolaanshahayga siinaya hay'adaha barnaamijyada tamarta Minnesota si ay :

- Xaqiijiyaan dakhligayga aalaabo kasta oo la xiriira xaq u-lahaanshayga.
- Siiso nuqulka codsigan hay'ado kale oo bixiyaan kaalmada tamarta haddii aan guuro.
- Siiso codsigayga qeybta Barnaamijka Cimilada xaafadda.
- Siiso macluumaadka ku qoran codsigayga qeybta iga iibisa tamartayda, Waaxaha Ganacsiga, Adeegyada Bulshada, iyo Maamulka, Guddiga Waxtarka (korontada, kulaylka, tamarta, iwm) Dadweynaha ee Minnesota iyo Waaxaha Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada iyo Tamarta, iyo qandaraaslayaashooda.

Waxaan ogolaanshayaga ku bixinaya waxa ku saabsan Waaxda Adeegyada Bulshada ee Minnesota iyo hay'adaheeda in ay wadaagaan waxa khuseeya faa'iidooyinkayga kaalmada bulshada ama faa'iidooyinka xaq u-lahaanshaha, haddii mid kasta, oo la xiriira kaalmada tamarta ee xaafadeyda soo weydiisto.

Saxiixa codsigaan waxaa,

- Waxaan xaqiijinaya macluumaadka ku kooban codsigan in uu sax yahay, dhab yahay, iyo dhameystiran yahay waxaan ogahay in la weydiin karo waraaqo caddeymo ah.
- Waan ogahay in la igu ciqaabi karo ganaax iyo/ama xarig haddii aan Aniga oo og bixiyo macluumaad been ah.
- Waan ogahay in aan leeyhay xuquuqda ku qoran barnaamijyada tamarta, Waa I soo gaaray nuqulka ku qoran "Xuquuqdayda iyo Mas'uuliyadeyda."
- Waan ogahay Lambarkayga Badbaada Bulshada (Social Security) iyo lambarada aqoonsiga xubnaha ka tirsan qoyskayga in loo isticmaali doono maamulka barnaamijka si loo hubiyo keliya in hal faa'iido laga bixinayo halkii qoys.
- Waan ogahay in aan racfaan ka qoran karo go'aan kasta ay hay'adda gaarto.
- Waan ogolahay in la wadaago macluumaadka, sida ku cad qeybta kor.

Waxaa saxiixay: _____ Taariikh: _____

Fadlan soo celi codsigan 31ka, bisha Meey, 2006 ka hor

XAQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA (Fadlan u hayso tan rikoor ahaan)

Wac hay'adda deegaanka ee ku qoran arjiga haddii aad u baahato argigaan oo far waawayn ku qoran ama farta dadka indhaha la' (Braille). Haddii aadan fahmin macluumaadka hoos ku qoran, wac hay'adda deegaanka ee ku qoran arjiga waxaadna waydiisaa in lagu sharxo arjiga.

Ujeedada: Foomkani waxaa uu kuu sheegayaa xaquuqda aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran iyo wixii aad samayn lahayd haddii dhibaabooyin ku haystaan. Waa sharci in aan kuu sheegno sababta ayno ugu baahnahay macluumaadka ku qoran arjiga, macluumaadka sharci ahaan loo baahanyahay iyo sidii aynu u isticmaalayno. Foomkaan waxa uu kuu sheegayaa ciddii nala wadaagi karta macluumaadkan iyo waxa dhacaya haddii aad doorato in aadan na siin macluumaadka.

Sababta aan ugu baahanahay macluumaadkan?

- In aan qof ahaan kaa aqoonsano dadka kale
- In aan ogaano in lagu heli karo kaalmo.
- In ay noo suurta gasho in aan dawladda federaalka iyo gobolka ka helno macaawimada aad helaysid.
- In aan buuxino sharuudaha warbixineed uu federaalku sharciyeeyay.

Maxaa dhacaya haddii aadan macluumaad na siin? Xaq ayaad u leedahay in aadan na siin macluumaadka aan ku waydiisanno; haseyeeshee haddii aadan na siin macluumaadka waxa laga yaabaa in aanaan howl ku qaban karin ama aanaan kaa caawin karin biilasha shidaalka.

Macluumaadkee kaaga baahanahay si aan kuugu adeegno? Waxaan u baahanahay in aan helno macluumaadka soo socda:

- Magacaaga iyo magacyada qoyskaaga oo dhan.
- Cinwaankaaga
- Lambarkaaga Caymiska Bulshada (Social Security Number)
- Magacyada Shirkadaha leh korontada iyo shidaalka.
- Nooca Shidaal ee aad guriga u isticmaasho.
- Cadadka Shidaal ee aad isticmaashay xilligii u dambeeyay.
- Dakhliga adiga iyo qoyska oo dhan soo galay.

Lambarada Caymiska Bulshada (Social Security Numbers): Lambarada Caymiska Bulshada waxaa loo adeegsan doonaa maamulka barnaamijyada tamarta iyo in lagu hubiyo codsabayaasha xaqa u leh iyo xubnaha qoyska ka tirsan keliya in ay helaan hal barnaamij oo ah faa'iidada kulayla sanadkiiba. Waxaa kale oo laga yaabaa in loo isticmaalo koombiyuutar ka raadinta kaalmada kuu munaasab ah, dib u eegidda barnaamijka iyo horumarinta, iyo baarista hawlaha xisaabtanka.

Somali

Macluumaadkee kaaga bahannahay si ay noogu suurta gasho in aan kaalmada kugu habboon ee federaalka ama gobolka ku helno isla markaana ayno u buuxino sharuudaha warbixineed ay u baahanyihiin?

- Da'daada iyo da'da dadka kale ee kugula nool gurigaaga?
- Haddii qof guriga ka mid ah qabo cudur aan daweymsin (chronic).

Yaa kale ee arkaya macluumaadkan? Shaqaalaha uga baahan in ay hawshooda qabsadaan ee ka tirsan: Hay'adaha Kaalmada Tamarta ee xaafadda, Waaxda Ganacsiga iyo Maamulka ee Minnesota, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Dadweynaha ee Maraykanka (U.S.), iyo Tamarta. **Haddii aan kaa helno ogolaansho qoraal ah** waxaan kale oo la wadaagaynaa macluumaadkan, hay'adaha dadwenaha (community), ha'adaha dawladdaha hoose iyo kuwo gobolka ee adeega dadweynaha, hay'adaha waxbarashada iyo hay'adaha kale ee dawladda.

Muddo intee le'eg ayaan haynaynaa macluumaadkan? Shacigu waxaa farayaa in aan hayno macluumaadkan 3 sanno.

Galkaaga ama feylkaaga ma eegi kartaa? waa ay kuu bannaantahay in aad eegto waxa ku qoran feylkaaga.

Maxaad samayn haddii ay kula noqoto in feylka wax ka khaldanyihiin? U sheeg wixii kula khaldan Ha'yaddaada kaalmada ee Tamarta (BKT).

Xaggee ayaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah ee ku saabsan xaqa aad u leedahay qarsoodiga macluumaadkaaga? Weydii hay'ddaada kaalmada tamarta (BKT).

Maxaa dhacayaa haddii aad na siiso macluumaad been ah? Haddii aad si ula kac ah been ugu soo qorto mid kasta ee ka mid ah foomamkaan , waxaa ayno kugu soo oogi karnaa been abuur. .Hay'adu waxa ay baari kartaa saxnimada macluumaad kaste ee aad na siiso. Sida kaliya oo hay'addaani ay ku helikarto macluumaad waa adiga oo saxiix ku ogolaaada. Haddii aadan saxiixin foomkan, waxaa laga yaabaa in aanaan howl kuu qaban karin kana caawin karin biilasha shidaalkaaga.

Waxaa ku saaran waajibaadka soo socda:

Waa in aad noo sheegtaa:

- Haddii aad horay u heshay kaalmo xagga bixinta biilka tamarta ee bilowgii xilligan jiilaalka (qaboobaha)
- Haddii aad u guurtid cinwaan kale waa in aad noogu soo sheegtaa 30 maalmood gudahood.
- Haddii shirkadda shidaalka ama gaaska ama korontadu kaa wareegto ama aad iska badashid.

Waa in aad iska bixisaa biilka shidaalkaaga. Ogsonow in barnaamijka in uu bixindoona biilka qaarkiis oo kaliya. Waa in aad adigu iska bixisaa inta kale ee harsan.

Xaqquqda aad u leedahay in aad hesho kaalmo:

Waxa aad xaq u leedahay:

- In aad mar labaad arji soo qoratid haddii aan wax kaalmo ah lagu ogolaan waayo.
- In aad dalbato in lagu kordhiyo kaalmada haddii aad u baahato.
Tussaale ahaan marka kaalmo dheeraad ah loo baahan karo waxaa ka mid ah:
 - Shiidaalkii ayaa kaa go'ay gaaskana waa laga goosan doonaa.
 - Kuleylkii guriga ayaa kuu shaqeyn waayey.
- In aad ogaato habka iyo sharciga aan raacno marka aan go'aan ka gaareyno ciddii la siin doono kaalmo.
- Marka aad na siiyo macluumaadka oo dhan kadib, in aad ogaato kaalmadii aad ku helikartid muddo macquul ah.
- In aad ogaatid sababta aanu anagu muddo macquul ah kuugu sameyn waynay kaalmadii aad arjiga ku dalabtay.

In aad rafcaan ku soo dalbato muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo malintii aad jawaabta arjigaagii ogaatay haddii:

- Wax kaalmo ah lagu ogolaan waayo.
- Ay kula noqoto in aan macluumaad khaldan adeegsanay markii aanu go'aanka gaareynay.
- Aad heli weydid kaalmadii lagu ballan qaaday.

Habkee ayaad cabasho u samayn kartaa?

Haddii ay kula noqoto in lacagta lagaa bixiyey ayna ahayn intee laga rabay, ama aanan lagu qaban howlihii aad fileysay in lagu qaban doono, waa in aad warqad cabasho ah u soo qortaa Ha'adda Kaalmada Tamarta ee degmadaada ee ku qoran arjiga. Halkaan ku qoro (kadibna xifdiso) cinwaanka iyo telefoonka.

Hhaddii ay ku qancin weydo jawaabtu, qoraal u soo qor cinwaanka (Sarkaaalka Racfaanka ee) hoose:

Appeals Officer
Energy Assistance Program
MN Department of Commerce
85 East 7th Place, Suite 500
St. Paul, Minnesota 55101-2198

Haddii aad dareemeysid in si dadka kale ka duwan laguula dhaqmay sabatuna ay kula noqoto waxyaabaha hoos ku taxan midkood ama ka badan, waa in aad qoraal u qortaa labada cinwaan ee hoosta ku qoran.

Waxaybahaas waxaa ka mid ah: midab, jinsiyad, dalkaagii hore, diin, jinsi, da', guur ama doobnimo, siyaasadaha aad aaminsantahay, ama aad naafo ama dhaawac ka tahay xagga jirka, maskaxda ama dareenka (emotional).

MN Department of Human Rights
190 East Fifth Street
St. Paul, Minnesota 55101

AMA

US Department of Health and Human Services
Office for Civil Rights, Region V
233 North Michigan Avenue, Suite 240
Chicago, Illinois 60601

Waa in aad keentaa Lambarka Badbaada Bulshada (Social Security) ee qof kasta oo ka tirsan qoyska oo leh wax dakhli ah (waxaa ku jiraan faa'iidooyinka). Kani waa loo baahan yahay!

Ku calaamadeey (x) **dhamaan meelaha dakhliiga** ka soo galo (oo ay ku jiraan faa'iidooyinka) ee xubnaha ka tirsan qoyskaaga.

Haddii aad ku guul-darreysato in aadan keenin waraaqaha loo baahan yahay hasha codsigaaga dib ayey u dhaci doontaa. Fadlan is ku day in aad nuqulo soo dirtid, maadaama waraaqaha asalka ah dib loo soo celin doono.

QEYBTA 3 waxaa lagu weyddinaya nooca guriga aad ku nooshahay, muddada aad ku nooleyd guriga haadan degan tahay, in aad guriga iska leedahay ama kiro uu yahay, iyo kharasha guriga **bishii** intuu yahay.

Haddii aad tahay qof kirayste ah, fadlan waxa kale oo aad buuxisaa inta hoose ee qeybtan.

QEYBTA 4 waa in la buuxiyaa keliya haddii kulaylka gurigaa aad u isticmaalaysid gaas dabiiciga ama koronto IYO haddii aad doonaysid in aad codsatid barnaamijka Sharciga Badbaadinta Cimilada Qabowga. Si aad ugu qalantid barnaamijka Sharciga Badbaadinta Cimilada Qabowga, buuxin dheeraad ah ee qeybtan, waa in aad la xiriirtaa shirkada waxtarkaaga (kulaylka, biyaha , koronta, tamarta iwm) waxaadna bilowdaa qorshaha lacag bixinta.

QEYBTA 5 waxaa lagu weydiinaya meesha aad ka heshid kulaylka iyo tamarta gurigaaga. Waxaad hubisaa magaca shirkada waxtarka (kulaylka, biyaha, tamarta, korontada iwm) ama ganacsada shidaalka ee aad doonaysid in loo diro kharshka iyo lambarkaaga xisaabta in ay sax yihiin.

Si aad codsigaaga boostada ugu soo dirtid, waxaad isticmaashaa baqshada soo celinta ee ku lifaaqan. Waxaad hubisaa in cinwaanka hay'adda xaafaddaada ee codsiga u diraysid in uu ka muuqdo dariishada yae ee baqasha korkeeda ku taalo. Waxaad hubisaa in aad ku dartay:

- θ **Arjigaan** oo si dhameystiran loo buuxiyay lana soo saxiixay.
- θ Nuqullada ama koobiyada **caddeynaya dakhliga (proof of income)** ee qof kasta ee ka tirsan qoyska ee saddexdii bilood ee la soo dhaafay.
- θ Nuqullada **biilkii kululaynta (heating)** iyo **biilkii korontada** ee u dambeeyey.

Haddii aad ku guul-darreysato in aad ku darin dhamaan macluumaadka loo baahan yahay socodka hawsha codsigaaga dib ayey u dhaci doontaa iyo go'aanka xaq u-lahaansha faa'iidooyinka dib ayuu u dhacaya.

Sii wad bixinta biilashaada. Arigaaga sida ugu dhakhsaha badan ee aan awoodno ayaan howshiisa u dhameystiraynaa! Warqad ayaan kuu soo diraynaa marka aan dhameystirno howlaha arjiga.

Waxa aad na **soo wacdaa oo kaliya haddii:**

- lagaa goosto korontada ama kululaynta (heat),
- aadan awoodin in aadna haysan cid shidaalka kuu soo rarata, ama
- adigu aad LEEDAHAY guriga (oo uuna ahayn ijaar) qalabka kuleylkuna kuu shaqeyn waayo.